Qoraalka oo af-finnish laga turjumay laguna turjumay af-soomaali.

**In sawnada la isticmaalaa waa caado sal ku leh dhaqanka finnishka ah, laakiin gurigii ku gubtay Hakunila wuxuu muujinayaa saameynta ay leedahay daryeelka iyo isticmaalka ammaanka ah ee burjikooyinka korontada ku shaqeeya**

Xarunta baadhitaanada shilalka (OTKES) waxaay diyaarisay baadhitaankii gurigii dabaqa ku yaallay ee ku gubtay Hakunila, Vantaa 8.10.2023 ee ay ku dhinteen shan qof. Aabaha qoysku wuu iska badbaadiyay guriga gubanayay.

*”Hakunila waxaa ku gubtay guri dabaqa koowaad ku yaallay: in guriga laga baxo suurta gal ayaay ahayd. Albaabka barandaha waxaa hor yaallay fadhi wayn oo adkeeyay in barandaha loo adeegsado meesha labaad ee guriga loogaga bixi lahaa. Guriga dab-sheegeyaal shaqeynaya ayaa ku yaallay, laakiin sababtu waxaay doonto ha noqotee hooyada qoysku way fahmi wayday dhawaaqa dab-sheegeyaasha iyo qiiqa badan ee guriga ka jiray inay tilmaamayeen in guriga laga baxo in loo baahnaa”* Sidaas ayaa sheegay hoggaamiyaha baadhitaanka Timo Naskali.

*” Baadhitaanka waxaa lagu ogaaday in burjikooyinka sawnooyinka badankoodu sida loo daaraa ay fududdahay. Farsamooyin ilaalinaya ammaanka sida qufulka carruurta iyo kuwo la midana badanaa ma laha. Burjikada sawnada badanaa si fudud loogama arko in uu daaranyahay ama in wakhti uu daarmo lagu buuxiyay. Burjikada ayaa si aanan ku talo gal ahayn loogu buuxiyay in ay shidanto sawnadu. Markii ay daarantay waxaay keentay in ay kululaysay darbigii alwaaxa ee ka dambeeyay burjikada sawnada illaa uu dab qabsaday darbiga. Arrintaas waxaa suurta galiyay in ay daciiftay hawada burjikada dhex mari lahayd oo qaboojin lahayd iyadoo ay sabab u ahayd isticmaalka muddada dheer ee dhagaxaanta burjikada. Ammaanka sawnooyinka korontada ku shaqeeya wuxuu badanaa ku salleysanyahay waxqabadka isticmaalaha oo ”nidaamka uu ku shaqeeyo” in ku filan ma taageerayo isticmaalka ammaanka ah”,* ayuu ku sii daray hadalkiisii hore Naskali.

Dhagaxaanta burjikada dib looma raseynin lamana baddalin sannaddo badan sida muuqatay. Daryeelka ama beddelaadda dhagaxaanta burjikada caadooyin loo joogteeyay oo shaqeynayaa ma jiraan, inkastoo ay muhiim u yihiin isticmaalka ammaanka ah ee burjikada sawnada.

Xarunta baadhitaanka shilalka ayaa hadda kahor baadhitaan ku sameysay guri ku gubtay Vuosaari 2016-kii. Dabkaas waxaa ku dhintay afar qof oo kala ahaa hooyo iyo saddex carruur ah oo yaryar. Dabku wuxuu ka dhashay burjiko koronto ku shaqeysa oo daarantay iyada oo aanan loogu talo galin markii lagu buuxiyay wakhtiga ay daarmeysay. Qiyaastii hal saac kahor intaanu dabku dhalanin ayaay sawnadu kululaatay. Gurigaasi wuxuu ahaa mid ku yaallay dabaqa lixaad, kumana rakibnayn dab-sheegeyaal. Xarunta baadhitaanka shilalka ayaa dhacdadaas kaddib ku talisay in ammaanka burjikooyinka sawnada la kordhiyo oo lagu daro qufulka carruurta. Talo-bixintaas qayb ahaan ayuunbaa loo hirgaliyay.

Baadhitaanka waxaa sidoo kale ku soo baxay ammaanka deggenaanshaha iyo nolol-maalmeedka dadka soo galootiga ah.

*”Waa in layska ilaaliyaa in arrinta laga hadlayo laga dhigo wax dadka oo dhan khuseysa. Hooyada qoysku waxaay waddanka ku timidday nidaamka isku keenidda qoyska. Waxqabadyada dal la qabsiga si buuxda umay helin ama way ka soo daaheen. Qofka waddanka ku yimaadda nidaamka isku keenidda qoyska waxaa dhacda in la qabsigiisa waddanka in badan oo ka mid ah mas’uul uu ka noqdo ehelka kaga soo horreeyay dalka. Xattaa marka qofka waddanka soo degay uu muddo dheer dalka joogay caadooyinka la xidhiidha ammaanka iyo nolosha maalinlaha ah waxaay noqon karaan kuwo wali qariib ku ah”*, sida uu sheegay Naskali.

Qoraalka oo af-finnish laga turjumay laguna turjumay af-soomaali.

Intaanu dhicin dhibkaasi gugii 2023 waxaa la oggolaaday sharci cusub oo horumarinta dal la qabsiga la xidhiidha oo hirgalay 1.1.2025 oo ahayd shilkaas dabadii. Sida ku cad soo jeedinta dowladda, waa daruuri in la kordhiyo helidda iyo ka qaybqaadashada waxqabadyada dal la qabsiga ee waalidiinta guriga carruurta ku xanaaneeya, si loo taageeri karo sida imika si ka fiican dumarka soo galootiga ah ka qaybqaadashadooda bulsho iyo shaqaaleysiintooda iyo dal la qabsiga qoyska oo dhan.

Baadhitaanka ammaanka waxaa sidoo kale lagaga salgaadhayaa waxqabadka saraakiisha dowladeed.

Dhibaatadu waxaay ka dhacday soone hore loo ogaa in diyaar ahaanta badbaadinta ee waaxda badbaadadu ay ahayd mid aanan dhammeystirnayn. Waxqabadka lagu saxayay god-dalooladaas waa la bilaabayba, laakiin waxqabadka lama dhameystirin. Soonaha oo dhismeyaal badan oo cusub laga waday in lagu horumariyo awoodda waxqabad ee waaxda badbaadinta waxaay u baahnayd in la aasaaso ilo-awoodeedyo cusub, tusaale ahaan in la dhiso xarun cusub oo dabdamis, taasina wakhti badan ayaay qaadanaysay.

Marar badan ayaa gurmadka degdegga ah la wacay intii uu gurigu gubanayay. Gurmadka degdegga ah si degdeg ah ayaay gurmadka hore u codsadeen. Si kastaba ha ahaatee in xaaladda sawir guud laga helo way adkayd. Gurmadka degdegga ah iyo daryeelka hore markii hore warbixin buuxda kamay haysanin dadka uu dabku saameeyay tiradooda, taasina waxaay dib u dhac ku keentay u wacidda ambulaansyada.

Arrinta fiirada gaarka ah u baahan ee ammaanka la xidhiidha ee ay si gaar ah u sheegayso Xarunta baadhitaanka shilalku waa muhiimadda daryeelka joogteysan uu leeyahay. Xarunta baadhitaanka shilalku waxaay warbixintii dhexe ku sheegtay inay tahay in dhagaxaanta burjikada loo baddalo sida ay ku taliyeen shirkadaha soo saaray oo ah sannadkii hal mar, si hawadu ay u dhex mari karto burjikada oo aanay si xad dhaaf ah u kululaanin. Isla markaasna waxaa muhiim ah in la hubiyo xaaladda guud ee burjikada iyo hareeraraheedaba.
https://turvallisuustutkinta.fi/fi/index/ajankohtaista/tiedotteet/2024/hakunilantulipalossaolleenkiukaantutkintajatkuu.html

**Macluumaad dheeraad ah:**

Hoggaamiyaha baadhitaanka Timo Naskali, tel. 02951 50740